



Lacagta qaabilaadda iyo tan isticmaalka waa ay ka yaraanayaan intii hore laga bilaabo 1.9.2024

Baarlamaanka dalkaan Finland waxaa uu go'aan ku gaaray in la yareeyo lacagta qaabilaadda iyo tan isticmaalka, taasoo ka qayb ah hadafka dowladda ee ah dhaqqaale beekhaaminta. Cadadka lacagta qaabilaadda ama tan isticmaalka ee aad heleyso waa ay ka yaraan doontaa intii hore laga bilaabo 1.9.

Lacagta qaabilaadda, laga bilaabo 1.9.2024

	Cunto lama siiyo / bishii	Cunto ayaa laga siiyaa xerada qaxootiga / bishii
Qofka keligiis ah	300 €	88 €
Dadka kale ee ka weyn 18-sano	254 €	72 €
Qofka keligiis ilmo mas'uul ka ah	336 €	97 €
Ilmaha da'doodu u dhexeyso 10-17- sano ee qoyska la nool	210 €	60 €
Ilmaha da'diisu ka yar tahay 10- sano, ee qoyska la nool	191 €	57 €

Lacagta isticmaalka, laga bilaabo 1.9.2024

Lacagta isticmaalka ee bishiiba la siiyo ilmaha da'doodu ka yar tahay 16-ka sano ee aan waalidkood la socon ayaa noqon doonta mustaqbalka **26 euroa**, sidoo kale ilmaha buuxiyay da'da 16-ka sano ayaa qaadan dona **47 euroa**, waa haddii uu ilmuhi ku nool yahay waaxda loogu talaggalay carruurta aan qaangaarin ee si dhammaystiran wax walba loo siiyo. Lacagta isticmaalka waxaa dhici karta in ay intaas ka sii yaraato, haddii sabab cad lagu saleeyo, iyadoo la tixgelinaayo da'da ilmaha iyo heerka korriinkiisa.

Isbeddelkaan wax hawl ah ugama baahna qofka macmiilka ah

Sidii caadiga ahayd ayaad xeradaada qaxootiga uga sii dalban kartaa codsigaaga lacagta qaabilaadda ama tan isticmaalka, xerada qaxootiga sidii caadiga ahayd ayay u falanqaynaysaa codsigaaga.



Waa inaad ku talaggashaa arrinka ah, in lacagta aad isticmaali doonto ay ka yar tahay intii hore. Haddii aad u baahan tahay, waxaad xaaladdada dhaqaale kala hadli kartaa shaqaalaha xerada qaxootiga.

Haddii aad hore u heshay go'aanka lacagta qaabilaadda ama tan isticmaalka ee wixii ka dambeeyya 1.9.2024-ka, xeradaada qaxootiga ayaa adiga kuu soo diraysa go'aanka cusub ee arrinkaas la xiriira. Si taxaddar leh u akhri go'aanka. Haddii aad wax su'aal ah ka qabto arrinkaan, waxaad la xiriirtaa xeradaada qaxootiga.